Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Badanaa La Iska Waydiiyo Hagida Dib u Furida

Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada *(La cusbooneysiiyay 7-24-2020)*

Hoos waa jawaabaha su’aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) ee ku saabsan Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada ee ku saabsan COVID-19 (Hagida Guud ee Badrooniyada) ee Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA). OHA waxay bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso in bulshada fahamto hagida, ka jawaabaan su’aalaha ayna xaqiijiyaan sida hagida u quseyn karto xaaladaha gaarka ah. FAQ-yadaan waxaa la cusbooneysiin karaa muddo kadib. Dokumintiga FAQ-ga looguma tallogelin inuu qaato booska hagida, laakin waxaa loogu talagalay inuu fasiro, kaabo, oo uu caawiyo buuxinta sharaxaadaha hagida.

Su’aalaha qeybta guud

S1: Hagidee ayay xarumaha soo kabsiga, hay’adaha caafimaadka maskaxda, adeegyada la talinta ama hay'adaha kale ee daaweynta raacayaan xiliga dib u furida?

J1: Xarumaha soo kabsiga, hay'adaha caafimaadka maskaxda, adeegyada la talinta ama hay'adaha daaweynta kale ee aanan sameynin hab-raacyada caafimaadka waa inay raacaan Hagida Badrooniga Guud.

S2: Hagidee ayay xarumaha daaweynta deegaanka ama bixiyayaasha caafimaadka dabeecada u isticmaalayaan dib u furida?

J2: Xarumaha daaweynta deegaanka waa inay raacaan Hagida Xarunta daaweynta Caafimaadka Dabeecada ee loogu tallogalay Dhammaan Xarumaha Daaweynta iyo kuwa loogu tallogalay Barnaamijyada Daryeelka Bukaan jiifka ee Daaweynta maskaxda, sida ay quseyso.

S3: Waa maxay hagida loogu tallogalay xaalada wadaagida xafiiska?

J3: Shaqsiyaadka wadaagayo booska xafiiska waa inay wakhti kasta kala fogaadaan masaafo lix (6) fuud. Mugga ugu badan ee booska waxaa lagu go’aaminayaa u qondeeynta 35 fuud oo wareeg ah qofkiiba. Badrooniyada waa inay raacaa dhammaan hagida OHA ee quseyso oo loogu tallogalay qeybtooda.

S4: Miyay jirtaa hagid loogu tallogalay tabarucayaasha usoo gala xarunta inay alaabo keenaan?

J4: Tabarucayaasha waxaa quseeyo hagida loogu tallogalay ganacsiga/warshadaha ay ka shaqeeyaan. Badrooniga wuxuu sidoo kale rabi

karaa inuu siiyo dhammaan tabarucayaasha warbixin guud oo ku saabsan sida ugu wanaagsan oo ay u illaalin karaan nafsadooda iyo dadka kale, iyo halisaha laga yaabo inay ku lugleedahay bixinta adeegyada tabaraucayaasha.

S5: Hagidee ayay tahay inay raacaan kulamada soo kabsiga faca (tusaale ahaan, Qarsoodiga Qamriistaha) marka lagu jiro Wajiga 1-aad iyo Wajiga 2-aad?

J5: Kulamada soo kabsiga faca waa inay raacaan Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada iyo hagida kale ee qeybta OHA, haddii ay guseyso, iyadoo ku saleysan goobta kulanka. Intaas waxaa dheer, kulamada soo kabsiga faca waa inay raacaan xadeynta cabirka usu imaanshaha ee hagida Usu imaanshaha oo loogu tallogalay wajiga uu kujiro gobolka ay kulamadaas ka dhacayaan.

S6: Biibitooyinka shiishada ayaa laga xiray degmooyinka marxalada asaasiga ah iyadoo la raacayo Amarka Fullinta ee Gubanatooraha ee 20-27. Goorma ayaa loo ogolyahay inay dib u furaan?

J6: Waqtigaan, biibitooyinka shiishada looma ogola inay ka shaqeeyaan gobolka, oo ay ku jiraan degmooyinka kujira marxalada aasaaska ah, Wajiga 1-aad ama Wajiga 2-aad.

Badbaadada shaqaalaha ee goobta shaqada

S1: Muxuu badrooniga u baahanyahay inuu sameeyo haddii shaqaale muujiyo aastaamaha COVID-19?

J1: Badrooniga waa inuu raacaa Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada. Badrooniga waa inuu faraa shaqaalaa jiran inay guriga joogaan ama guriga aadaan haddii ay jiradaan iyaga oo shaqada joogo. Shaqaalaha waa inuusan shaqada imaan haddii ay qabaan:

- Qandho.
- Aastaamaha sida qufaca, mataga, ama shubanka.

Haddii shaqaalaha imaado shaqada isaga oo muujinayo aastaamo, ama haddii ay yeeshaan aastaamao iyaga oo shaqada joogo, badrooniyada waa inay ka gooniyeeyaan shaqaalaha jiran shaqaalaha kale. Shaqaalaha jiran waa in guriga loo diraa islamarkiiba ama waa inuu raadsadaa daryeel caafimaad oo ku haboon haddii ay muhiim tahay.

Badrooniyada waa inay si joogta ah ugu sheegaan shaqaalaha inay daboolaan qufacooda iyo hindhista, dhaqaan gacmahooda, ayna guriga joogaan markii ay jiranyihiin. Badrooniyada waa inay hubiyaan in xeerarka goobta shaqada ay ogolaanayaan fasaxa jirada si markaas dadka u sameeyaan sheyga saxda ah iyaga oo la illaalinayo shaqaalaha ay isla shaqeeyaan.

Haddii shaqaale ku dhaco caabuqa COVID-19, badrooniyada:

- Waa inay kala shaqeeyaan caafimaadka dadweynaha si loo go'aamiyo shaqaalaha u dhawaaday, muddada dheer la qaatay iyagoo isku dhow shaqaalaha jiran ee gelin karo halista soo gaarista COVID-19.
- Waa inay ogeysiiyaan shaqaalaha u dhawaaday shaqaalaha jiran inay suurtagal tahay inuu soo gaaray cudurka. Waxaa looga baahanyahay sharci ahaan in badrooniyada illaaliyaan aqoonsiga shaqaalaha qabo COVID-19 markii ay ogyesiinayaan shaqaalaha kale.

S2: Miyaa badrooniyada loo ogolyahay inay qaadaan heerkulka shaqaalaha? Haddii ay sidaas tahay, miyuu badrooniga ku qori karaa heerkulka qofka diiwaanka?

J2: Badrooniyada way qaadi karaan heerkulka shaqaalaha, laakin waa inay niyada ku hayaan in shaqsiyaadka qaar ee qaba COVID-19 aysan yeelan doonin qandho, iyo qandhada micnaheedu ahayn in qofka qabo COVID-19. Cabirka heerkulka iyo diiwaan walba waa in lagu hayaa qarsoodi, sida looga baahanyahay sharci ahaan. Heerkulka shaqaalaha waa in loo qaadaa sida suurtagal ahaan ugu asturnaan badan si markaas aqoonsiga shaqaale walba oo qabo qandho loogu dhigi karo qarsoodi. Wixii ah liiska aastaamaha COVID-19, dib u eeg Hagida CDC.

S3: Miyuu ganacsiga u baahanyahay inuu siiyo shaqaalaha tababarka badbaadada ka hor dib u furida?

J3: Maya, hase yeeshee, si xoogan ayaa loogu talinayaa in ganacsiyada siiyaan shaqaalahooda tababarka badbaadada shaqaalaha ka hor dib u furida. Wixii ah illaha habdhaqamada badbaadada ee loogu talagalay soo-gaarista cudurka ee goobta shaqada fadlan tixraac Hagida Badrooniga Guud.

Gaadiidka

S1: Ma sadex (3) baa ama lix (6) fuud masaafada la kala fogaanayo markii aad saarantahay gaariga badrooniga bixiyay oo ay la jiraan darawalka iyo rikaab xiran maaskarooyin?

J1: Iyadoo la raacayo hagida gaadiidka, in ka badan hal qof gaarigiiba ayaa la ogolyahay haddii shaqsiyaadka ay xiranyihiin maaskarooyin ama waji daboolashada ayna joogteyn karaan masaafo kala fogaansho oo sadex (3) fuud ah.

Ku noolaanshaha loojka, kirooyinka iyo deegaanka

S1: Miyaa hoteelada, sariirta iyo quracda, iyo loojka kaloo habeen dhaxa ah loo ogolyahay inay shaqeeyaan? Miyay jiraan qaanuuno kala duwan oo loogu talagalay martigelinta dagayaasha deegaanka iyo kuwa ka yimid meel ka baxsan degmada ama wadanka? Taxadaraadyo noocee ah ayay tahay in la qaado si loo shaqeeyo?

J1: Haa, xarumaha loojka waa loo ogolyahay inay shaqeeyaan oo loogama baahneyn inay xiraan marka la eego mid kastoo kamid ah amarada Gubanatooraha. Si kastaba ha noqotee, xarumaha adeega cuntada ee sariirta iyo quracda ayaa xadidnaa Wajiga 1-aad kahor. Xarumaha loojka waxaa looga baahanyahay inay raacaan Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Waji Difaaca iyo Waji Daboolka iyo Hagida Guud ee loogu tallogalay Badrooniyada. Sariirta iyo quracda waa maqaayado shatiyeysan waana inay u hogaansamaan Hagida ganacsiga Maqaayada ee Wajiga 1-aad ama Wajiga 2-aad iyadoo ku xiran gobolka ay ku leeyihiin ganacsigooda. Ma jiraan wax ah sharuudo gaar ah oo lagula dhaqmayo daganeyaasha deegaanka ama kuwa ka imaaday meel ka baxsan gobolka ama wadanka. Xarumaha loojka waa inay raacaan tallooyinka Hagida Nadiifinta OHA ee loogu tallogalay Hoteelada iyo Albeergooyinka si loo yareeyo halista faafida COVID-19.

S2: Miyay jiraan hagida loogu tallogalay milkiilayaasha guriga muddada gaaban, gaar ahaan haddii ay qabaan marti laga helay COVID-19? Ma inuu qofka jiran joogaa meel kiro ah inta lagu jiro muddada gooniyeynta ama ma inuu guriga aadaa si uu iskugu gooniyeeyo?

J2: Milkiilayaasha meelaha kirada waa inay u jeermisdilaan si waafaqsan hagida CDC. Haddii shaqsiga laga helo COVID-19 isagoo joogo goob ah kirada muddada gaaban, isaga/iyada waa inay ku laabtaan gurigooda si ay iskugu gooniyeeyaan hadiiba tani la sameyn kara iyadoon cudurka la gaarsiinayn dadka kale. Haddii kale shaqsiga waa inuu joogaa meesha kirada muddada gaaban inta lagu gudajiro muddada gooniyeyntooda.

S3: Ururka milkiilaheyga guriga (HOA) waxay leeyihiin xarumaha madadaalada la wadaago (barkada banaanka, tuubo kulul, qolka jimicsiga, garoonka ciyaaraha gudaha/garoonka kubada koleyga, qolka ciyaaraha iyo qolka kooxda) oo ay heli karaan daganeyaasha iyo martida. Miyaa xarumahaan loo tixgelinayaa kuwa gaar ah? Miyay u hogaansanaanta hagida gobolka u tahay iqtiyaar xarumaha HOA-yaga?

J3: HOA-da leh barkadaha iyo tuubooyinka kulul waa inay u hogaansamaan Hagida Barkada Dabaasha ee OHA. OHA waxay ku talisay u hogaansanaanta hagida gobolka oo dhan ee maaskaraha, gaashaanka wajiga iyo daboolada wajiga iyo hagida hay'ada la xiriiro jirdhiska, sida ay u quseyaan.

S4: Ma xaqiijin kartaa haddii ganacsiyada nadiifinta deegaanka ay u qalmaan gelitaanka guryaha si ay u nadiifiyaan iyo haddii ay sidaas tahay, taxadaradee ayaa loo baahanyahay?

J4: Haa, adeegyada nadiifinta waxay geli karaan guryaha. Milkiilayaasha guryaha iyo kireystayaasha ayaa masuul ka ah go'aansashada haddii loo ogolaanayo adeegyada nadiifinta inay soo galaan guryahooda. Ganacsiyada nadiifinta deegaanka way geli karaan guryaha si ay u nadiifiyaan oo waxaa lagu talliyay inay raacaan hagida Nadiifinta iyo Jeermisdilka CDC ee loogu tallogalay badrooniyada.

Maaskarooyinka, Waji Daboolada iyo Daboolada wajiga

S1: Miyaa looga baahanyahay ganacsiyada inay ku laasimaan shaqaalaha bulshada-wajahayo inay xirtaan maaskarooyin?

J1: Haa. Inta badan ganacsiyada waa looga baahanyahay inay ku laasimaan shaqaalaha inay xirtaan maaskarooyin, gaashaanada wajiga ama waji daboolada iyagoo raacayo Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarooyinka, Gaashaanada Wajiga, Waji Daboolada.

S2: Waa maxay hagida maaskarooyinka, gaashaanada wajiga ama waji daboolada gudaha iyo banaanka meesha aysan jirin u baylah noqoshada bulshada, sida warshada soosaarka ama shaqaalaha ka shaqeeyo "gadaasha guriga"?

J2: Shuruudda ah in la xirto maaskaro, gaashaanta wajiga ama waji daboolka ma ahan oo keliya mid ku saabsan ilaalinta dadweynaha, waxay sidoo kale ku saabsan tahay ilaalinta shaqaalaha kale. Maaskarooyinka, waji daboolashada ama gaashaanada wajiga looma baahno markii la joogo ama lagu jiro goob halkaasi oo shaqaalaha, qandaraaslaha ama tabarucaha aysan dhaxgaleyn bulshada **lana** joogteyn karo masaafo kala fogaansho oo ah lix (6) fuud ama ka badan oo u dhaxeyso dadka kale.

S3: Miyay jiraan wax lacago deeq ah oo ay u heli karaan ganacsiyada inay ku iibsadaan PPE loogu tallogalay shaqaalaha ku soo laabanayo shaqada?

J3: Ganacsiga Oregon, iyo Waaxda Shaqada Oregon, Xoghayaha Gobolka Oregon, iyo Waaxda Macmiilka iyo Adeegyada Ganacsiga Oregon waxay isu geysay warbixinta si ay u caawiso milkiilayaasha ganacsiyada yaryar ee Oregon, shaqaalaha iyo dadka kale ee la macaamilayo saameynta COVID-19. Gaar ahaan, ganacsiyada waxay heli karaan qalab muhiim ah, sida PPE ama waji daboolada iyagoo u maraya websaydka Qorsheeyaha Ganacsiga Yar.

S4: Miyaa waji daboolashada looga baahanyahay goobta xafiiska oo aanan u furneyn bulshada?

J4: Waji daboolada loogama baahno goobta xafiiska gaarka ah oo u dhow bulshada marwalba, laakin shaqaalaha waxaa si xoogan loogu talinayaa inay xirtaan waji daboolada markay joogaan goob walba oo aysan suurtogal aheyn in la joogteeyo lix (6) fuud oo laga fogaado dadka kale.

S5: Wixii ah ganacsiyada shaqaalahooda looga baahanyahay inay xirtaan maaskaraha wajiga, miyay shaqaalaha xiran karaan gaashaanka wajiga ee bacda ah badelkii maaskaraha dharka ah?

J5: Haa, gaashaanka wajiga ee daboola fuuda, gaaro hoosta garka, oo daboolo dhinacyada wajiga si ayaa la ogolyahay.

S6: Miyay Hagista Gobolka oo Dhan ee Maaskarada, Waji Daboolka, Gashaanta Wajiga khuseysaa hawlaha dhisida gudaha dhismaha?

J6: Haa. Haddii ka fogaanshaha jireed oo ugu yaraan ah lix (6) fuud aysan suurtogal aheyn, shaqaalaha dhismaha banaanka waa inay xirtaan maaskaro, waji daboolada ama gaashaanka wajiga.

S7: Miyaa dadka alaab geynta ee FedEx, UPS, Amazon, USPS looga baahanyahay inay xirtaan maskarooyin, gaashaanka wajiga ama waji daboolada?

J7: Waji daboolada looma baahno markaad geynayso baakido ama waraaqo, laakin isticmaalka maaskaraha wajiga si xoogan ayaa loogu taliyay markii aysan suurtogal aheyn in la joogteeyo lix (6) fuud oo laga fogaado dadka kale.

S8: Miyay jiraan liis rasmi ah oo ah sharuudaha caafimaadka kuwaasi oo ganacsiga ama goobta ay tahay inay dhaafaan sharuuda maaskarada, gaashaanka iyo daboolada wajiga?

J8: Haddii qof curyaan ah, sida lagu qeexay Xeerka Curyaanka ee Maraykanka (ADA) uusan xiran karin maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolada, goob kastoo aqbasho dadweynaha waxay u baahaneysaa inay la shaqeyso qofkaas si ay ugu raadiyaan badel macquul oo lagu helayo adeegyadooda, Badel macquul ah oo aan ahayn in macmiilka la iskaga ogolaado inuu galo gudaha isagoon xirnayn maaskaraha, waji daboolada ama gaashaanka wajiga. Ganacsiyada iyo goobaha waa inaysan weydiin shaqsiyaadka cadeynta curyaannimada ama xaalada kaloo caafimaadka.

S9: Ganacsiyadee ayaa looga baahanyahay inay siiyaan maaskaro, gaashaanada wajiga ama waji daboolada shaqaalahooda sida waafaqsan hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Gaashaanka Wajiga, Waji Daboolashada?

J9: Ganacsiga iyo howlwadeenka boosaska gudaha iyo banaanka ee u furan bulshada waxaa looga baahanyahay inay siiyaan maaskarooyinka, gaashaanada wajiga, ama waji daboolada dhammaan shaqaalaha. Wixii ah liiska ganacsiyada looga baahanyahay fadlan tixraac hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Gaashaanka Wajiga, Waji Daboolada.

Boosaska gudaha ah ee u furan bulshada waxaa ku jiro boosaska gudaha ah, haddii dadweynaha leeyahay ama gaar loo leeyahay, meesha bulshada ay geli karto xaquuq ahaan ama casuumaad ahaan, muujiyo ama tilmaamo, haddii ay tahay lacag bixin ahaan ama aysan aheyn. Intaas waxaa dheer aagaga bulshada ee ganacsiyada kor lagu qeexay, sida boosaska waxaa ku jiri karo, laakin kuma xadidno: dhismaha gelitaanka ama boosaska caadiga ah, wiishashka, qubeyska iyo dhismooyinka ama qolalka kulamada ee ka baxsan guryaha gaarka ah meesha dadka isugu imaadaan ujeedooyinka bulshada, rayidka, dhaqanka ama diinta.

S10: Haddii marka miiska la joogo ay masaafo lix (6) fuud ah u dhaxeyn karto shaqaalaheena iyo macmiilka, oo aan leenahay dhalo kala qeybineyso iyaga, miyaa weli shaqaalaheyga looga baahanyahay inuu xirto maaskaraha markuu caawinayo macaamiisha?

J10: Haa. Shaqaalaha, qandaraaslayaasha iyo tabarucayaasha waa inay xirtaan maaskaro, gaashaanka wajiga ama waji daboolada inay joogaan goob halkaasi oo

shaqaalaha, qandaraaslaha ama tabarucaha uusan dhaxgaleyn bulshada mooyee **iyo** in lix (6) fuud ama ka badan laga fogaan karo dadka kale.

Badrooniyada iyo baaritaanka

S1: Haddii shaqaalaha ku dhaco COVID-19, miyuu badrooniga uga baahanyahay inay baaritaan helaan markale ka hor inta aysan ku soo laaban shaqada? Haddii ay sidaas tahay, yaan la xiriirnaa si aan u helno natiijooyinka — Adeegyada Caafimaadka Gobolka, ama miyuu shaqaalaha u baahanyahay inuu gudbiyo natiijooyinka ka imaanayo bixiyaha daryeelka caafimaadka?

J1: Hagida Guddiga Fursada Shaqada Loo Simman yahay (EEOC) waxay guud ahaan dhahaan in badrooniyada u baahan karaan baaritaan sababtoo ah shaqsiyaadka ku jiro goobta shaqada ee qaba fayraska waxay ku soo rogayaan halis toos ah caafimaadka dadka kale. Si kastaba ha noqotee, badrooni walba wuxuu weli u baahanayaa inuu sameeyo go'aamin la gaareeyay oo ku saleysan goobta shaqada ee quseysa. Xaalada waxay xoog u lahaan doontaa shaqooyinka ku lugleh dhawaansho dhow oo lala yeesho dadka kale waxayna u fududaan doontaa shaqooyinka aanan lahayn (tusaale ahaan, guriga ka soo shaqeynta). Badrooniyada haddii ay suurtogal tahay waxay u baahanyihiin inay la tashtaan la talinta sharciga si ay toos u isticmaalaan oo u fulliyaan sharuudahooda baaritaanka shaqaalaha iyo haddii shaqaalaha uu urur shaqaale yahay, sheegida waajibaadyo walboo gorgortan ah.

Maamulka Caafimaadka Oregon wuxuu ku taliyay baaritaanka dadka oo dhan ee leh aastaamaha COVID-19. Baaritaanka dadka aan laheyn aastaamaha guud ahaan looguma tallin oo waa inaanan loo isticmaalin sida sharuud shaqada ah. Baaristan noocan ah waxay uga dhigan tahay culays aan loo baahnayn shaqaalaha. OHA waxay ku dhiirogelineysaa dhammaan badrooniyada inay maalin walba ka baaraan shaqaalaha oo dhan aastaamaha COVID-19.

Ka reebida shaqaalaha xanuunsan shaqada, joogteynta ka fogaanshaha jireed, maaskaraha oo qasab ah in lagu xirto gudaha iyo sidoo kale meel walba oo aan masaafo kala fogaansho oo lix (6) fuud aanan lla joogteyn karin, iyo gacmo dhaqashada oo joogtada ah dhammaan waa tallaabooyin muhiim ah oo ay tahay in badrooniyada qaadaan si ay uga dhigaan goobaha shaqada kuwa badbaado leh.

S2: Ma in badrooniga ogeysiiyaa shaqaalahooda warbxinta shaqaalaha laga helay COVID-19?

J2: Badrooniga loogama baahno inuu ogeysiiyo shaqaalahooda haddii shaqaale isla shaqeeyo laga helo COVID-19, laakin wuu rabi karaa inuu sidaas sameeyo. Maamulka caafimaadka bulshada gobolka iyo deegaanka waxay la soo xiriirayaan shaqaale walba ee laga yaabo inuu baylah u noqday cudurka. Haddii badrooniga go'aansado inuu siiyo ogeysiinta qaar shaqaalaha, badrooniga waa inuu hubiyaa in aqoonsiga shaqaalaha qaba COVID-19, lagu hayo qarsoodi. Waxaa looga baahanyahay sharci ahaan in badrooniyada illaaliyaan aqoonsiga shaqaalaha qabo COVID-19 markii ay ogyesiinayaan shaqaalaha kale.

S3: Ma inuu ganacsiga ogeysiiyaa bulshada in hal ama ka badan oo shaqaalahooda ah laga helay COVID-19?

J3: Ma jiraan sharuud sharci oo ganacsiga ku ogeysiinayo bulshada in shaqaale laga helay COVID-19.

S4: Ma inuu ganacsigu ku wargeliyo OHA ama OR-OSHA in hal ama ka badan oo shaqaalahooda ah laga helay COVID-19?

J4: Waqtigaan la joogo bixiyaha daryeelka caafimaad iyo sheybaarada waxaa looga baahanyahay inay ku soo wargeliyaan dhacdooyinka COVID-19 Maamulka Caafimaadka Oregon iyo Maamulka Caafimaadka Bulshada Deegaannka. Waxaa jiri karo goobaha qaar ee shatiyeysan, sida xarumaha daryeelka muddada dheer, oo looga baahanyahay inay ku soo wargeliyaan dhacdooyinka COVID-19 maamulkooda shatiyeynta. Ganacsiga waa inuu la tashtaa qareenka si u fahmaan waajibaadyadooda sharciga.

S5: Haddii badrooni u baahanyahay in shaqaalaha laga baaro COVID-19, ma inuu badrooniga bixiyaa lacagta baaritaanka?

J5: Haa, sida waafaqsan sharciga Oregon [ORS 659A.306], waxay ku tahay sharci daro in badrooniga weydiiyo shaqaale, sharuud uga dhigo sii wadashada shaqada, inuu bixiyo qarashka baaritaanka caafimaadka, sida baaritaanka COVID-19.

Hirgelinta

S1: Sidee ayaa hagida gobolka oo dhan ee maaskaraha, gaashaanka wajiga iyo waji daboolada loo fulliyaa?

J1: Gobolka ayaa marka koowaad raadinayo inay la shaqeeyaan ganacsiyada iyo dadka masuulka ka ah boosaska gudaha iyo banaanka ee bulshada u furan, si loo baro iyaga wax ku saabsan sharuudaha, ka hor sameynta tallaabo walboo fullin ah.

Ganacsiyada iyo dadka masuulka ka ah boosaska bulshada gudaha iyo banaanka waxaa laga filanayaa inay hubiyaan in shaqaalahooda, qandaraaslayaasha, tabarucayaasha, macaamiisha iyo martida u hogaansamaan sharuuda maaskaraha, gaashaanka wajiga, waji daboolada. Haddii ganacsiga ama qofka masuulka ka ah booska gudaha iyo banaanka sameynayo dadaal walba ee loogu hogaansamo hagida, tani waa la tixgelinayaa marka la qaadayo tallaabo walboo fullin ah.

Waa dambiga fudud ee Heerka C in lagu xadgudbo shuruudda maaskarada, waji daboolka, gaashaanta wajiga. Maamulka Caafimaadka ee Oregon iyo Maamulka Caafimaadka Dadweynaha ee Maxalliga ah waxay soo saari karaan ciqaabo madani ah waxayna qaadi karaan talaabooyin dhaqangelin ee ku xadgudubka shuruudda maaskarada, gaashaanta wajiga, waji daboolka. Shakhsiga ama ganacsiga haysta shati gobolka soo saaray, waxaa laga yaabaa in laga qaado tallaabo shatiyeed oo ku saabsan ku xadgudbka hagista maaskarada, gaashaanta wajiga, waji daboolka.

S2: Waa maxay nidaamka lagu soo sheegayo ganacsiga furan oo aanan raaceynin hagidaha loogu tallogalay maaskarooyinka iyo isticmaalka kala fogaanshaha jireed?

J2: Dhammaan cabashooyinka la xiriiro Dib u furida waxaa lagu aadin karaa Badbaadada Shaqada iyo Caafimaadka Oregon (OR-OSHA).

Helida dokumintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad su'aalo qabtid, fadlan kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.